

سُورَةُ الرَّحْمٰنِ

بِسْمِ اللّٰهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِیْمِ ﴿١﴾
الْحَمْدُ لِلّٰهِ رَبِّ الْعٰلَمِیْنَ ﴿٢﴾
الرَّحْمٰنِ الرَّحِیْمِ ﴿٣﴾ مَلِكِ یَوْمِ الدِّیْنِ ﴿٤﴾
اِیَّاكَ نَعْبُدُ وَاِیَّاكَ نَسْتَعِیْنُ ﴿٥﴾ اِهْدِنَا
الصِّرَاطَ الْمُسْتَقِیْمَ ﴿٦﴾ صِرَاطَ الَّذِیْنَ اَنْعَمْتَ
عَلَيْهِمْ غَیْرَ الْمَغضُوبِ عَلَيْهِمْ
وَلَا الضَّالِّیْنَ ﴿٧﴾

سُورَةُ الرَّحْمٰنِ

بِسْمِ اللّٰهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِیْمِ

۱ ذٰلِكَ الْكِتٰبُ لَا رَيْبَ فِيْهِ هُدًى
لِّلْمُتَّقِیْنَ ۲ الَّذِیْنَ یُؤْمِنُوْنَ بِالْغَیْبِ وَیُقِیْمُوْنَ الصَّلٰوةَ
وَمِمَّا رَزَقْنٰهُمْ یُنْفِقُوْنَ ۳ وَالَّذِیْنَ یُؤْمِنُوْنَ بِمَا اُنزِلَ
اِلَیْكَ وَمَا اُنزِلَ مِنْ قَبْلِكَ وَبِالْآخِرَةِ هُمْ یُوقِنُوْنَ ۴
اُولٰٓئِكَ عَلٰی هُدًى مِّنْ رَّبِّهِمْ وَاُولٰٓئِكَ
هُمُ الْمُطْلِقُوْنَ ۵

Suurat Al-Faatixah

سُوْرَةُ الْفَاتِحَةِ

1. Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.
2. Mahad Eebaa iska leh ee barbaariyaha Caalamka ah (Koonka).
3. Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.
4. Ee hanta maalinta abaalmarinta (Qiyaamada).
5. adiga unbaan ku caabudaynaa, adiga unbaana kaa kaalmo waydiisanaynaa (Eebow).
6. ee nagu hanuuni jidka toosan (Xaqa).
7. Jidka kuwii aad unicmaysay eedan u cadhoonin dhuminna.

Suuradani waa suurad wayn, Kitaabka Ilaahayna ka billowdo, wax walbana in lagu billaabo ay fiicantahay. Salaadana in lagu akhriyo ay waajibtahay.

kulmisatayna Ammaanta Eebe, Mahadiisa, Qiyaamada, Cibaadada Eebe iyo kaalmo waydiisigiisa iyo Inuu ku toosiyo Jidka toosan ee xaqa ah, Jidkaasoo ah kay qaadeen Dadkii Fiic fiicnaa ee Eebe unicmeeyey oo ahaa Nabiyadii, Rumeeyayaashii, Shuhadadii iyo kuwii suubanaaba ee ka leexday Wadada kuwii loo cadhooday ee yuhuudda ahaa iyo kuwii dhumay ee Nasaarada ahaa.

waxaana lagu magacaabaa Suuradan magacyo Badan oy ka midtahay Hooyada Quraanka Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgelyo Eebe Korkiisa hayecele).

Wuxuu yidhi: Amarkastoon lagu bilaabin Bisinka waa Naaqus.

Sidoo kale wuxuu yidhi: Salaadu uma jirto Ruuxaan akhriyin Faatxada.

Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim.

Fadligeedana halkan kuma soo koobi karnowaxaase fiican in la fahmo waxay kulmisatay laguna dhaqmo, Eebana dhab loo caabudo dhabna looga kaalmo waydiisto, had iyo jcerna la digtoonaado hanuun iyo toosnaanna Eebe la warsado iyo inuu kaa duwo jidka xun ey qaadeen xaqdiidayaashu iyo gaalada dhamaanteed.

Rasuulkuna wuxuu yidhi: Dhugbadane waa ruuxa naftiisa xisaabiya una camlala Geeri dabadeed. (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yecele).

Waxaa wariyey Imaam Axmed iyo kuwo kale. Al-Faatixah (1-7).